IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA

# الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

الجمهورية الصومالية الديمقراطية

Sannadka 11aad Muqdisho 30 Nofember 1983 L. Ir 11

FAAHFAAHIN BIL SOO BAXA نشرة شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J. D. S. QIIMADU Waa 5 Shan lambar walba—RUKUNKA: Sannadii waa Sh. So. 100 Somaliya gudaheeda—dibaddeedana waa Sh. So. 300 Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janayo Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo wixii ka yar waa 2 laba Ih. Rukunka & qorista kale waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah—lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

## K O O B N I I N

### QAYBTA KOWAAD

### S H A R C I

SHARCI L. 20 ee 16 Nof. 1983, Oggolaansho Heshiis Amaaheed oo dhex maray JDS iyo Bankiga Horumarinta Afrika. Bogga 693

### QAYBTA LABAAD

### XEER

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 25 ee 16 Nof. 1983, Meel-marinta Heshiis Amaaheed ee dhexmaray JDS iyo Bankiga Horumarinta Afrika. » 695

DECREE L. 25, on 16 Nof. 1983, Instrument of Ratification. » 696

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 26 ee 31 Okt. 1983, Magacaabid Guddoomiyaha MB Gobolka Tog-dheer ee BURCO. » 697

Wakaaladda M. Qaranka

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 27 ee 26 Nof. 1983 Qaabka iyo Dhismaha Wakaaladda Ganacsiga Faleenka iyo Xabkaha.— » 705

WASAARADDA H. GUUD, 4.4.81, Naado Dhul Jaalle Maxamed Cali Ibraahim L. 451 » 706

WASAARADDA H. GUUD, 4.4.81, Naado Dhul Jaalle Nuur Cali Maxamed L. 452 » 707

WASAARADDA H. GUUD, 4.4.81, Naado Dhul Jaalle Ruqiya Sheekh Muuse L. 453 » 708

WASAARADDA H. GUUD, 4.4.81, Naado Dhul Jaalle Maxamuud Maxamed Hayle L. 454 » 709

WASAARADDA H. GUUD, 4.4.81, Naado Dhul Jaalle Afyare Garaad Guure L. 455 » 710

WASAARADDA H. GUUD, 4.4.81, Naado Dhul Jaalle Axmed Maxamed Xuseen L. 456 » 711

WASAARADDA H. GUUD, 21.4.81, Naado Dhul Jaalle Xasan Maxamed Cumar L. 457 » 712

WASAARADDA H. GUUD, 21.4.81, Naado Dhul Jaalle Cabdulqaadir Axmed Maxamed L. 458 » 713

WASAARADDA H. GUUD, 21.4.81, Naado Dhul Jaalle Cusmaan Maye Macallim L. 459 » 714

WASAARADDA H. GUUD, 21.4.81, Naado Dhul Jaalle Saciid Jaamac Cali L. 460 » 715

WASAARADDA H. GUUD, 21.4.81, Naado Dhul Jaalle Maxamed Gabayre Cali L. 461 » 716

WASAARADDA H. GUUD, 21.4.81, Naado

WASAARADDA H. GUUD, 21.4.81, Naado Dhul Jaalle Ooyaaye Maxamed Nuur L. 463 » 718

WASAARADDA H. GUUD, 21.4.81, Naado Dhul Jaalle Maryan Cabdi Mataan L.464 » 719

WASAARADDA H. GUUD, 21.4.81, Naado Dhul Jaalle Ibraahi mAxmed Xaaji L.465 » 720

MAXKAMADDA G. TOG/DHEER, 6.11.83, Lumid Jeeg War. L. 699300-044659, ku qoran Aamina Maxamuud Axmed L. 466 » 721

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 9.11.83, Lumid Jeeg War. L. 684227 ku qoran Maxamuud Cawil Cusmaan L. 467 » 722

MAXKAMADDA G. BANAADIR. 12.11.83, Lumid Jeeg War. L. 106813 ku qoran Cabdi Ismaaciil L. 468 » 723

MAXKAMADDA G. BANAADIR. 12.11.83, Lumid Jeeg War. L. 106812 ku qoran Maxamed Cabdi Ismaaciil L. 469 » 724

MAXKAMADDA G. BANAADIR. 12.11.83, Lumid Jeeg War. L. 059188 ku qoran Maxamed Cabdi Ismaaciil L. 470 » 725

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 13.11.83, Lumid Jeeg War. L. 339789 ku qoran Maxamuud Cabdi Dhunkaal L. 471 » 726

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 13.11.83, Lumid Jeeg War. L. 348459 ku qoran Axmed Cali Jimcaale L. 472 » 727

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 15.11.83, Lumid Buug Kayd L. 18813 ku qoran Luul Shire Cali L. 473 » 728

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 22.11.83. Lumid Buug Keyd L. 30719 ku qoran Maxamed Gaabow Dhalxo L. 475 » 729

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 28.11.83, Lumid J. War. L. 635382 ku qoran Maxamed Aadan Cabdi L. 476 » 730

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 82.11.83, Lumid J. War. L. 541233 ku qoran Maxamed Faarax Siyaad L. 477 » 731

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 30.11.83 Lumid Jeeg. War. L.707042 ku qoran Axmed Sheekh Cumar L. 479 » 732

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 30.11.83 Lumid Jeeg. War. L. 707041 ku qoran Axmed Sheekh Cumar L. 480

MAXKAMADDA G/TOGDHEER BURCO, 11.10.83, Lumid J g War. L. 044013 ku qoran Axmed Sugule Warsame L. 481 » 734

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 28.11.83, Lumid Jeeg. War. L. 633382 ku qoran Maxamed Aadan Cabdi L. 476 » 735

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 28.11.83, Lumid Jeeg. War. L. 541233, ku qoran Maxamed Faarax Siyaad L. 477 » 736

SHIRKADDA ALLAMAGANS, Ogeysiin Samiley L. 450/bis » 737

Sharci lambar 20, taariikh 16 Nof. 1983, Oggolaansho Heshiis Amaaheed oo dhaxmaray JDS iyo Bankiga Horumarinta Afrika, looguna tala galay Warshadaha yar-yar iyo kuwa meel dhaxaadka ah.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Oggolaanshha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1. Waxaa la oggolaaday Meelmarinta heshiiska dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Bankiga Horumarinta Afrika kuna saabsan dhamaad amaah lacageed oo gaari karta ilaa 5 000.000 «Hal Xisaabeed» (Units of Account) oo lagu maalgelinayo kharajka lacagta adag ee Mashaariicda yar-yar iyo kuwa meel dhaxaadka ah kuna qeexan heshiiska dhexmaray Bankiga Horumarinta Soomaaliyeed iyo Bankiga Horumarinta Afrika.

2. Heshiiskaas waxaa lagu kala saxiixday Magaalada Abidjan ee Dalka «Ivory Coast» taariikhdu maraky ahayd 19kii Abriil 1983.

3. Heshiiskaas waxay ka mid noqonayaan sharcigan iyagoo lifaaq u ah.

Qod. 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan qodobada heshiisyada ku tilmaaman qod. 1aad ee sharcigan waxay leeyihiin qiimo iyo astaan sharci la heer ah Sharciyada iyo Xeerarka Dalka, waxaana dhaqan gelintooda la waafajinayaa Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Heshiisyadaas.

Qod. 3aad

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxaa awood loo siiyay inuu meelmariyo heshiiska sharcigan lagu tilmaamayo.

Qod. 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta la-gu soo saaro Faafista Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Muqdisho, 16 Nov. 1983

MADAXWEYNAHA JDS

(Maxamed Siyaad Barre)

Xeerka Madaxweynaha JDS lambar 25 taariikh 16 Nof. 1983, Meel-marinta heshiis amaaheed ee dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyo iyo Bankiga Horumarinta Afrika.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 67aad, faqradda 5aad iyo Qod. 82aad, faqradda 4aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Shar[illegible]n tirsigiisu yahay L. 20 ee taariikhdiisu 16.1[illegible] ee Guddiga Joogtada Golaha Shacbigu ku oggolaaday heshiiska Xeerka ku tilmaaman;

MARKUU TIXGELIYAY: In ay lagama maarmaan tahay in heshiiskaas la meel-mariyo;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda.

Qod. 1aad

Waxaa la meel-mariyay heshiiska amaaheed ee dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Bankiga Horumarinta Afrika, looguna tala galay Mashaariicda Warshadaha yar-yar iyo kuwa meel dhaxaadka ah, heshiiska waxaa lagu kala saxiixday Magaalada Abidjan ee Dalka «Ivory Coast» taariikhdu markay ahayd 19 Abriil 1983.

Qod. 2aad

Heshiiskaas wuxuu Dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya ku yeelanayaa astaan sharci ah, wuxuuna dhaqan galayaa marka la is dhaafsado warqadaha meel-marinta.

Qod. 3aad

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 16 Nov. 1983

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

DECREE No. 25 of 16 Nof. 1983, Instrument of Ratification.-

THE PRESIDENT OF SDR

HAVING SEEN: Article 67 (5) and Article 82 (4) of the Constitution of SDR;

HAVING SEEN: L a w , n o. 20, of 16-11-1983, o n the base of which the Peopleis Assembly has approved the Agreement Specified in this Decree;

HAVING CONSIDERED: The necessity to Ratify this Agreement;

HEREBY PROMULGATES

ARTICLE I

The line of credit Agreement Between the African Devolopment Bank and the Somali Devolopment Bank for financing the foreign Exhange- cost of Small and Medium - Scale Industdial and related sub-projects, signed in Abidjan (Ivory Coast) on 19 April 1983, is Hereby Ratified.

ARTICLE II

This Agreement shall have the force of law in the territory of the Somali Democratic Republic, and it's implementation will effect upon the exchange of instrument of Ratification.

ARTICLE III

This Decree shall come into force upon signature by the President of the Somali Democratic Republic, and will be published in the Official Bulletin.

Mogadisho, 16 Nov. 1983

THE PRESIDENT OF S.D.R.

(Mohamed Siad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 26 ee 16 Nof. 1983, Magacaabid Guddoomiyaha MB Gobolka Tog-dheer ee Burco.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qodobka 82aad ee Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY: Sharciga Lam. yahay 3, soona baxay 10kii Jannaayo 1970kii, kuna saabsan dhismaha Maxkamadda Badbaadada Dalka, iyo beddelaaddii ku dhacday;

MARKUU TIXGELIYEY: Talada Guddoomiyaha Maxkamad Badbaadada Dalka;

WUXUU GO'AAMIYEY

Qod. 1aad

Jaalle G/le Dr. Cabdi Cabdullaahi Ibraahim, (Gabax) oo ka tirsan Ciidanka XDS, waxaa loo magacaabay Guddoomiyaha MB Gobolka Tog-dheer Burco;

Qod. 2aad

Guddoomiyuhu wuxuu yeelanayaa Gunno dhan Sh. So. 800/=(Siddeedboqol) bishiiba, waxaana laga bixinayaa Miisaaniyadda Agaasinka Guud ee MJDS;

Qod. 3aad

Dekereetada waxay dhaqan gelaysaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 31 Okt. 1983

MADAXWEYNAHA JDS

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

Waan aragnay ee Diiwaangelinnay;
Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb. 2;

Muqdisho, 8 Nov. 1983;

Hantidhawraha Guud
Dr. Xuseen Cabdulle Cali

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 27 ee 26 Nof. 1983, Qaabka iyo Dhismaha Wakaaladda Ganacsiga Faleenka iyo Xabkaha.-

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya;

MARKUU ARKAY: Sharciga lamb. yahay 14 ee 3.6.62 ee Dhismaha Dawladda;

MARKUU ARKAY: Sharciga Shaqaalaha Dawladda

WUXUU XEERIYEY

Qod. 1aad

Waxaa halkan lagu habeynayaa Qaabka, derejooyinka iyo Jagooyinka Wakaaladda Ganacsiga Faleenka iyo Xabkaha iyo Xafiisyada la xiriira sida ku cad Lifaaqa oo ah Qeyb ka mid ah Dekereetada.

Qod. 2aad

Waxaa lagu qiimeeyey Wakaaladda Ganacsiga Faleenka iyo Xabkaha Darajada «A».

Qod. 3aad

Sharci kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin Sharcigan waa la buriyey.

Qod. 4aad

Dekereetadani dhaqso ayey u hirgeleysaa waxayna ka mid noqon doontaa Sharciyada iyo Xeerarka JDS, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 26 Nov. 1983

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

WASIIRKA WASAARADDA GANACSIGA
(Maxamed Cumar Jaamac)

Waan aragnay ee Diiwaangelinnay
Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb. 28
Muqdisho, 26 Nov. 1983
Hantidhowraha Guud
Dr. Xuseen Cabdulle Cali

## KOOBID JAGOOYINKA — WAKAALADDA GANACSIGA FALEENKA IYO XABKAHA

| | A2 | A3 | A4 | A5 | Tiro A | B7 | B | Tiro B | C9 | C | Tiro C | Tiro D | Tiro Guud Jogooyin |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| Maareeyaha Guud | 1 | 1 | 2 | | 2 | 3 | 3 | 6 | 1 | | 1 | | 9 |
| Waaxda Ganacsiga Dibedda | | 1 | | 2 | 3 | 2 | 6 | 8 | | 4 | 4 | | 15 |
| Waaxda Ganacsiga Gudaha iyo Wax soo saarka | | 1 | | 2 | 3 | 14 | 4 | 18 | | 53 | 53 | 10 | 94 |
| Waaxda Cilmi Baarista iyo Horumarinta | | 1 | | 2 | 3 | 2 | 2 | 4 | | 3 | 3 | | 10 |
| Waaxda Maamulka iyo Lacagta | | 1 | | 2 | 3 | 13 | 15 | 28 | | 50 | 50 | 52 | 133 |
| Tiro Guud Jagooyin | 1 | 4 | 1 | 8 | 14 | 34 | 20 | 64 | 1 | 110 | 174 | 62 | 265 |

[SMAHA QAABKA WAKAALADDA GANACSIGA FALEENKA IYO XABKAHA ( WGF )

Maareeynta Guud

Faraca Xussus-dhawrka Guud

a Ganac. Dibedda

- Qaybta Suuq Doonka iyo Carwooyinka

Waaxda Ganac. Gudaha & wax soo-saarka

- Qaybta Ganacsiga Gudaha
- Qaybta Wax Soo Saarka

Waaxda Horumarinta iyo Cilmi Baarista

- Qaybta Cilmi Baarista
- Qaybta Horumarinta

Waaxda Maamulka iyo Lacagta

- Qaybta Xisaabaadka
- Qaybta Hawlaha Guud iyo Shaqaalaha

(1) Gobolka Sanaag — Laamaha Ceerigaabo, Ceel Afweyn iyo Badhan.

(2) Gobolka Bari — Laamaha Boosaaso, Qardho, Qandale, Caluula iyo Iskushuban.

(3) Gobolka Togdheer — Laamaha Burco.

(4) Gobolka W/Galbeed — Laamaha Hargeysa iyo Berbera (Hargeysa iyo Burco Xafiisyada ka furan waa Ilaalin Kontrobaanka).

# QAABKA WAKAALADDA GANACSIGA FALEENKA IYO XABKAHA (WGF)

| Jago Lamb. | Jago | Hawsha | Darajo | Tiro |
|---|---|---|---|---|
| | MAAREEYNTA GUUD | | | |
| WGF-001 | Maareeyaha Guud | Maamule | A2 | 1 |
| WGF-0002 | Lataliyaha Sharciga | Aqoonyahaan | A4 | 1 |
| WGF-0003 | Sarkaal Gobollada | Fuliye | B7 | 1 |
| WGF-0004 | Sarkaal Xiriirka Dadweynaha | Fuliye | B7 | 1 |
| WGF-0005 | Kormeere Sare | Fuliye | B7 | 1 |
| WGF-0006/8 | Kormeere | Fuliye | B | 3 |
| WGF-0009 | Xoghaynta Maareeyaha Guud | Karaani | C9 | 1 |
| | FARACA XUSUUS-DHAWRKA GCUD | | | |
| WGF-0010 | Sarkaal Fuliye Sare | Fuliye | B7 | 1 |
| WGF-0011 | Xusuus-dhawrka Qasoodiga | Fuliye | B | 1 |
| WGF-0012/13 | Karaani Xusuus-dhawre | Karaani | C | 2 |
| | WAAXDA GANACSIGA DIBEDDA | | | |
| WGF-1001 | Maareeye | Maamule | A3 | 1 |
| WGF-1002 | Makiinad Garaace | Karaani | C | 1 |

| go Lamb. | Jago | Hawsha | Darajo | Tiro |
|---|---|---|---|---|
| | **QAYBTA DHOOFINTA IYO SOO DEJINTA** | | | |
| GF-1003 | Madaxa Qaybta | Maamule | A5 | 1 |
| GF-1004 | Sarkaal Fuliye Sare | Fuliye | B7 | 1 |
| GF-1005/6 | Sarkaal Fuliye | Fuliye | B | 2 |
| GF-1007 | Makiinad Garaace | Karaani | C | 1 |
| | **QAYBTA SUUQ DOONKA IYO CARWOOYINKA** | | | |
| GF-1008 | Madaxa Qaybta | Maamule | A5 | 1 |
| GF-1009 | Sarkaal Fuliye Sare | Fuliye | B7 | 1 |
| GF-1010/11 | Sarkaal Fuliye | Fuliye | B | 2 |
| GF-1012/13 | Tafniidde | Fuliye | B | 2 |
| GF-1014/15 | Makiinad Garaace | Karaani | C | 2 |
| | **Waaxda Ganacsiga Gudaha iyo Wax Soo Saarka** | | | |
| GF-2001 | Maareeye | Maamule | A3 | 1 |
| GF-2002 | Makiinad Garaace | Karaani | C | 1 |
| | **QAYBTA GANACSIGA GUDAHA** | | | |
| GF-2003 | Madaxa Qaybta | Maamule | B7 | 1 |
| GF-2004 | Sarkaal Fuliye Sare | Fuliye | B7 | 1 |
| GF-2005/6 | Sarkaal Fuliye | Fuliye | B | 2 |
| GF-2007/26 | Iibiyayaalka Faleenka/Xabkaha | Karaani | C | 20 |
| GF-2027/20 | Makiinad Garaace | Karaani | C | 4 |
| GF-2031/40 | Adeege | Shaq. Hoose | D | 10 |

| Jago Lamb. | Jago | Hawsha | Darajo | Tiro |
|---|---|---|---|---|
| | **QAYBTA WAX SOO SAARKA** | | | |
| WGF-2041 | Madaxa Qaybta | Maamule | A5 | 1 |
| WGF-2042 | Sarkaal Fuliye Sare | Fuliye | B7 | 1 |
| WGF-2043/44 | Sarkaal Fuliye | Fuliye | B | 2 |
| WGF-2045/56 | Isuduwe Gobol/Degmo | Fuliye | B7 | 12 |
| WGF-2037/94 | Ilaaliye Contrabaanka | Karaani | C | 38 |
| | **WAAXDA CILMI BAARISTA IYO HORUMARINTA** | | | |
| WGF-3001 | Maareeye | Maamule | A3 | 1 |
| WGF-3002 | Makiinad Garaace | Karaani | C | 1 |
| | **QAYBTA CILMI BAARISTA** | | | |
| WGF-3003 | Madaxa Qaybta | Maamule | A5 | 1 |
| WGF-3004 | Sarkaal Fuliye Sare | Fuliye | B7 | 1 |
| WGF-3005 | Sarkaal Fuliye | Fuliye | B | 1 |
| WGF-3006 | Makiinad Garaace | Karaani | C | 1 |
| | **QAYBTA HORUMARINTA** | | | |
| WGF-2007 | Madaxa Qaybta | Maamule | A5 | 1 |
| WGF-3008 | Sarkaal Fuliye Sare | Fuliye | B7 | 1 |
| WGF-3009 | Sarkaal Fuliye | Fuliye | B | 1 |
| WGF-3010 | Makiinad Garaace | Karaani | C | 1 |

## WAAXDA MAAMULKA IYO LACAGTA

| Jago Lamb. | Jago | Hawsha | Darajo | Tiro |
|---|---|---|---|---|
| WGF-4001 | Maareeye | Maamule | A3 | 1 |
| WGF-4002 | Makiinad Garaace | Karaani | C | 1 |
| | **QAYBTA XISAABAADKA** | | | |
| WGF-4003 | Madaxa Qaybta | Maamule | A5 | 1 |
| WGF-4004 | Sarkaal Fuliye Sare | Fuliye | B7 | 1 |
| WGF-4005/14 | Xisaabiye Gobol/Degmo | Fuliye | B7 | 10 |
| WGF-4015/16 | Sarkaal Fuliye | Fuliye | B | 2 |
| WGF-4017/26 | Gaaliye Xisaabiye Gobol/Degmo | Fuliye | B | 10 |
| WGF-4027/29 | Makiinad Garaace | Karaani | C | 3 |
| WGF-4030/41 | Adeege | Shaq-Hoose | D | 12 |
| | **QAYBTA HAWLAHA GUUD IYO SHAQAALAHA** | | | |
| WGF-4042 | Madaxa Qaybta | Maamlle | A5 | 1 |
| WGF-4043/44 | Sarkaal Fuliye Sare | Fuliye | B7 | 2 |
| WGF-4045/47 | Sarkaal Fuliye | Fuliye | B | 3 |
| WGF-4048/69 | Baabuur Wade | Xirxadle | C | 22 |
| WGF-4070/93 | Kaydhaye | Karaani | C | 24 |
| WGF-4094/133 | Ilaaliye | Shaq.Hoose | D | 40 |

Tiro Guud Jagooyin: 265

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALEYI..

NAADO—DHUL

Waxaa la caddeynayaa in aalle Maxamed Cali I.. rchim uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo De.. Mag. ee W.H.Guud Xamar maalintii taariikhdu aha.. 13.2.79 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo k.. yaal Muqdisho Degmada ——————— Qaabkiisu.. yahay Rettangolar Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna f..dhiya 600 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORA..

| | |
|---|---|
| Waqooyi waxaa ka xiga: | Dhul Lamb. 108 W. |
| Koonfur waxaa ka xiga: | Dhul Lamb. 82 W. |
| Galbeed waxaa ka xiga: | Waddo |
| B a r i waxaa ka xiga: | Dhul Lamb. 94 W. |

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga a.. kikaraa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Sahanl.. iyo Deg.Mag. ee W.H.Guud Xamar, waxaana laga doo.. karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaab.. maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Sharci.. Rasmiga ah.—

AGAASIMAHA WAAXDA SAH. IYO DEG.MAG.

Kusime XaajiMaxamed Maye

T. 451

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALEYN.

N A A D O — D H U L

Waxaa la saddeynayaa in Jaalle Nuur Cali Maxamed uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg·Mag. ee W. H· Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 30·11·79 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Cabdulcasiis Qaabkiisuna yahay Retangol Addimihiisuna yihiin 40X30 kuna fadhiya 1200 Mdh·

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 179-180 C·

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo

B a r i waxaa ka xiga: Dhul Lamb· 188 C.

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg·Mag. ee W·H·Guud Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah·—

Muqdisho, 4 Apr· 1981

AGAASIHAMA WAAXDA SAH· IYO DEG.MAG·

Kusime Xaaji Maxamed Maye

L· 452

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALEYN.

N A A D O — D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Ruqiya Sheekh Muuse Sheekh Awees ay u soo qoratay arji Waaxda Sahanka iyo Deg·Mag. ee W·H,Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 10·7·80 ay ku wediisatay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Deg. WadajirQaab-kiisuna yahay Rettangolar Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 Mdh·

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

| | |
|---|---|
| Waqooyi waxaa ka xiga: | Waddo |
| Koonfur waxaa ka xiga: | Dhul Lamb. 93 W· |
| Galbeed waxaa ka xiga: | Waddo |
| B a r i waxaa ka xiga: | Dhul Lambar 107 W· |

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga ar-kikaraa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg·Mag. ee W·H·Guud Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 4 Apr· 1981

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG·MAG.

Kusime Xaaji Maxamed Maye

L· 453

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALEYN.

N A A D O — D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamuud Maamed Hayle uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg·Mag. ee W·H·Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 24·7·61 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Deg. Wadajir Qaabkiisuna yahay Rettangolar Addimihiisuna waa 30X20 kuna fadhiya 600 Mdh·

XOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Lamb· 93 W·

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 071 W·

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo

B a r i waxaa ka xiga: Dhul Lamb· 83 W·

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo DegMag· ee W.H·G· waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon bari ah laga billaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah·—

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG·MAG.

Kusime Xaaji Maxamed Maye

L· 454

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALEYN.

N A A D O — D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Afyare Garaad Guure uu u soo qortay ar i Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W.H.Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 12.3.80 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Wardhiigley Qaabkiisuna yhay Retangolaar Addimihiisuna yihiin 46,25X15 kuna fadhiya 693.75 Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed waxaa ka xiga: Suuq Xamar Jadiid

B a r i waxaa ka xiga: Jid

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg.Mag. ee W.H.Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga billaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 26 Mar. 1981

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG.MAG.

Kusime Xaaji Maxamed Maye

L. 455

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALEYN.

N A A D O — D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Axmed Maxamed Xuseen uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W.H.Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 23.2.80 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Yaaqshiid Qaabkiisuna yahay Retangol Addimihiisuna yihiin 40X30 kuna fadhiya 1200/= Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 857-859 Y.

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 856 Y.

B a r i waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 862 Y.

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg.Mag. ee W.H.Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga billaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 21 Feb. 1981

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEK.MAG.

Kusime Xaaji Maxamed Maye

L. 456

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALEYN.

N A A D O — D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xasan Maxamed Cumar uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W.H.Guud Xamar maalintii tiiraakhdu ahayd 9.2.81 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Yaaqshiid Qaabkiisuna yahay Retangol Addimihiisuna yihiin 20X15 kuna fadhiya 300/= Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Axmed Sheekh

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed waxaa ka xiga: Waddada Jan.Daa'uud

B a r i waxaa ka xiga: Xasan Cumar

Qofkii dapaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg.Mag. ee W.H.Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga billaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 21 Feb. 1981

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG.MAG.

Kusime Xaaji Maxamed Maye

L. 457

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALEYN.

N A A D O — D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdulqaadir Axmed Maxamed uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg·Mag· ee W·H·Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 4·3·78 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed oo ku yaal Muqdisho Degmada Yaaqshiid Qaabkiisuna yahay Retangol Addimihiisuna yihiin 40X30 kuna fadhiya 12000/= Mdh·

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Lamb· 858-860 Y·

Koonfur waxaa ka xiga: Waddada 21ka Oktoobar

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Lamb· 855 Y·

B a r i waxaa ka xiga: Dhul Lamb· 861 Y·

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg·Mag· ee W·H·Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga billaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah·—

Muqdisho, 21 Feb· 1981

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG· MAG·

Kusime Xaaji Maxamed Maye

L· 458

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALEYN.

NAADO—DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cusmaan Maye Macallin uu u soo qodtay arji Waaxda Sahanka iyo Deg·Mag· ee W·H·Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 11·2·81 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Wada ir Qaabkiisuna yahay Retangol Addimhiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600/= Mdh·

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul Lamb· 97 W·

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo

B a r i waxaa ka xiga: Dhul Lamb· 103 W·

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sa... iyo Deg·Mag· ee W·H·Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga billaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah·—

Muqdisho, 21 Feb· 1981

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG· MAG·

Kusime Xaaji Maxamed Maye

L· 459

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALEYN.

N A A D O — D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Saciid Jaamac Cali (Qoorsheel) uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg·Mag· ee W·H·Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 2·2·81 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Kaaraan Qaabkiisuna yahay Retangol Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600/= Mdh·

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Lamb· 45 K· Biis

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul Lamb· 49 K·

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Lamb· 48 K·

B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg·Mag· ee W·H·Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga billaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah·—

Muqdisho, 21 Feb· 1981

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG· MAG

Kusime Xaaji Maxamed Maye

L· 460

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYN.

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Gabeyre Cali uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W.H.Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 20.8.1980 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Degmada Wardhiigley Qaabkiisuna yahay ELLE Addimihiisuna yihiin (13,50X27) + (13,50X13,) = kuna fadhiya 546,75/= MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo

B a r i waxaa ka xiga: Wad-iyo dhul dad leeyahay

Qofkii danaynaaya dhulk aawuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg.Mag. ee W.H.Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga billaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 21 Feb. 1981

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.

Kusime Xaaji Maxamed Maye

L. 461

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYN.

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cali Dhuxul Axmed Maxamed uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg.Mag. ee W.H.Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 10.2.80 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Cabdulcasiis Qaabkiisuna yahay Retangolare Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 98 C.

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 106 C.

B a r i waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 104 C.

Qofkii danaynaaya dhulk aawuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg.Mag. ee W.H.Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga billaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 21 Feb. 1981

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.

Kusime Xaaji Maxamed Maye

L. 462

# WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYN.

## NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Ooyaaye Maxamed Nuur uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg·Mag· ee W·H·Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 26·1·81 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Kaaraan Qaabkiisuna yahay Retangol Addimihiisuna yihiin 15X20 kuna fadhiya 300/= Mdh·

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Lamb· 43 K·

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Lamb· 44 K· Biis

B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii danaynaaya dhulk aawuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg·Mag· ee W·H·Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga billaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah·—

Muqdisho, 21 Feb· 1981

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG· MAG·

Kuxime Xaaji Maxamed Maye

L· 463

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYN.

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maryan Cabdi Mataan ay u soo qoratay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W.H.Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 31.3.79 ay ku weydiisatay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Cabdulcasiis Qaabkiisuna yahay Retangol Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 22 C.

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo

B a r i waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 25 C.

Qofkii danaynaaya dhulk aawuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg.Mag. ee W.H.Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga billaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 21 Feb. 1981

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.

Kusime Xaaji Maxamed Maye

L. 464

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYN.

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Ibraahim Axmed Xaaji uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W.H.Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 22.3.78 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho egmada Yaaqshiid Qaabkiisuna yahay Retangol Addimihiisuna yihiin 60X20 kuna fadhiya 1200 Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur waxaa ka xiga: Wad. 21ka Oktoobar

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 860-859 Y.

B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii danaynaaya dhulk aawuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg.Mag. ee W.H.Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga billaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 21 Feb. 1981

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.

Kusime Xaaji Maxamed Maye

L. 465

MAXKAMADDA G. TOGDHEER/BURCO

UJEEDDO: Baafin Jeegagga Wareega ee Lambarradoodu kala yihiin: (1) 699300 (2) 044659;

GUDDOOMIYAHA MAX. G. TOGDHEER/BURCO

IYADOO UU ARKAY: Dacwadda ku saabsan Jeegagga Lumay;

HADDUU ARKAY: Ogaysiinta Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Burco;

HADDUU ARKAY: Qod. 69, Dl, 9.9.65 Luda Jeegagga Wareega ee ku qoran Jaalle Aamina Maxamuud Axmed kuia kala qoran tahay Lacagta dhan 1- Jeega W. Lam. 699300, Sh. So. 25,000/ 2- Jeega W. Lam. 04459 Sh. So. 10,000/;

WUXUU AMRAYAA

In loo Cusbooneysiiyo jeegaggaas wareega Jaalle Aamina Maxamuud Axmed marka ay ka soo wareegto muddo 20 Casho ah laguna sharciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LAGA CODSANAYAA

In Jeegaggaas Wareega ee cusub ee la samayn doono Gacanta laga saaro Jaalle Aamina Maxamuud Axmed iyadoo la sugayo mudadda kor ku xusan.

GUDDOOMIYAHA MAX. G/TOGDHEER BURCO

(Dr. Cabduraxmaan Sh. Maxamed)

L. 466

MAXKAMADDA G. BANAADIR

GUDDOOMIYAHA

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Jeeg Wareega dhumay oo l[illegible] barkiisu anaa 684227 lagana soo saaray Bang[illegible] Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2[illegible] kuna qoran lacag dhan Sh. So. 50.000/= uu isk[illegible] haa Jaalle Maxamuud Cawil Cusmaan sida ku [illegible] warqadda lambarkeedu ——— taariikhde[illegible] 8.11.83 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soo[illegible] liyeed Laanta Labaad;

HADDUU ARKAY: Qod.69 sharciga Lam. 2 ee 9.[illegible]

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga War[illegible] Lam. 684227 oo ku qoran Jaalle Maxamuud Cawil [illegible] maan, ayna ku jirto Sh. So. 50.000/=.

WUXUU FARAYAA

In Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliy[illegible] Laanta Labaad u beddelo Jeegga Wareega eekor[illegible] tilmaaman una sameeyo mid la ah kadib markay ka [illegible] wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maal[illegible] Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J[illegible] huuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, haddii int[illegible] horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 9.11.83

GUDDOOMIYAHA MGB

Dr. Cabdullaahi [illegible]

[illegible] 167

MAXKAMADDA G. BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Jeegga Wareega dhumay oo Lambarkiisu ahaa 106813 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Hargeysa kuna qoran lacag dhan Sh.So. 5.000/= uu iskalahaa Jaalle Maxamed Cabdi Ismaaciil sida ku cad warqadda lambarkeedu 009723 taariikhdu 10.11.83 ee Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xis-Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Wareega Lam. 106813 oo ku qoran Jaalle Maxamed Cabdi Ismaaciil ayna ku jirto Sh.So. 5.000/=.

WUXUU FARAYAA

In Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Hargaysa u badalo Jeegga Wareega ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu laabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 12.11.83

GUDDOOMIYAHA MGB

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 468

MAXKAMADDA G. BANAADIR

GUDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Jeegga Wareega dhumay oo Lambarkiisu ahaa 106812 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Hargaysa kuna qoran lacag dhan Sh.So. 5.000/= uu isklahaa Jaalle Maxamed Cabdi Ismaaciil sida ku cad warqadda lambarkeedu 009723 taariikhdu 10.11.83 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xis-Guud;

HADDUU ARKAY: Qod.69 sharciga Lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Wareega Lam. 106812 oo ku qoran Jaalle Maxamed Cabdi Ismaaciil ayna ku jirto Sh.So. 5.000/=.

WUXUU FARAYAA

In Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Hargeysa u beddelo Jeega Wareega ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, haddii inta ka horaysa aanwax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 12.11.83

GUDDOOMIYAHA MGB

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 469

MAXKAMADDA G. BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

DDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

DDUU ARKAY: In Jeega Wareega dhumay oo lambarkiisu ahaa 059188 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Hargeysa kuna qoran lacag dhan Sh.So. 1.000/= uu iskalahaa Jaalle Maxamed Cabdi Ismaaciil sida ku cad warqadla lambarkeedu 009723 taariikhdu 10.11.83 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xis-Guud

ADDUU ARKAY: Qod.69 sharciga Lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeega Wareega ...m. 059188 oo ku qoran Jaalle Maxamed Cabdi Ismaa...il ayna ku jirto Sh.So. 1.000/=.

WUXUU FARAYAA

In Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed ...aanta Hargeysa u badalo Jeegga Wreega ee kor ku ...maaman una sameeyo mid la mid ah kadib markay ... soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood ...aalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ... Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 12.11.83

GUDDOOMIYAHA MGB

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 470

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADUU ARKAY; In Jeeg War. dhumay oo lambarkii su ahaa 339789 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed laanta Labaad kuna qoran Lacag dhan Sh.So. 15.000 uu iska lahaa H/Jaalle Maxamuud Cabdi Dhuunkaal sidaa awgeed Warqadda Lambarkeedu ——— taariikhdu 13.11.83 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Labaad.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lamb. 2 ee 9.9.65

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeega War. Lam. 339789 oo ku qoran J. Maxamuud Cabdi Dhuunkaal ayna ku jirto Sh.So. 15.000

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Labaad u bedelo J. Wareega ee kor ku tilmaaman una sameyo mid la mid ah kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii, inta ka horeysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 1.11.83

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR

Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 471

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADUU ARKAY; In Jeeg War· dhumay oo lambarkii su ahaa 348459 lagana soo saaray Bankiga Ganac siga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Dhexe kuna qoran Lacag dhan Sh·So· 10·000 uu iska lahaa J/le Axmed Cali Jimcaale sida ku cad warqadda lamba rkeedu 009799 taariikhdu 13·11·83 ee Bankiga Gana csiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Xis· Guud·

HADDUU ARKAY: Qod· 69 Sharciga Lamb· 2 ee 9·9·65

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeega War· Lam· 348459 oo ku qoran Jaalle Axmed Cali Jimcaale ayna ku jirto Sh·So· 10·000

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Dhexe u bedelo J· Wareega ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah kadib markay ka soo waree gto muddo aan ka yarayn 15 maalmood Maalinta Go' aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J·D·S· Haddii inta ka horeysa aan wax is hortaag ah laga keenin·

Muqdisho, 13·11·83

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB· BANAADIR

Dr· Cabdulaahi Maxamed Maax

L· 472

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In Buug Keyd Dhumay oo lamba rkiisu ahaa 18813 lagana soo saaray Bankiga Gana csiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xarunta kuna qorneyd Lacag dhan Sh.So. 32.155 uu iska la haa Luul Shire Cali oo Bankiga Ganacsiga iyo Ke ydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lamb. 2 ee 9.9.65

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd Lam. 18813 oo ku qoran magaca Luul Shire Cali ayna ku jirto Lacag dhan Sh. So. 32.155.

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Xarunta u bedelo J. Luul Shire Cali Buugga Keydka, ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yaray 30 Maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho, 15.11.83

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR

Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 473

MAXKAMADDA GOBOLKA MUDUG

MARKUU ARKAY: Arjiga Jaalle Timiro Daahir Xa san oo taariikhdiisu tahay 20·11·83 oo ay ku cadde ysay in uu ka lumay J· War· L· 472477 ee 19·7·83 oo ay ka qaadatay Bankiga Ganacsiga iyo Kayd ka Soomaaliyeed laanta Gaalkacyo ayna ku qor rayd Lacag dhan Sh·So· 50·000 (Konton kun)·

MARKUU ARKAY: Warqadda Baafinta Bankiga oo Taariikhdeedu tahay 14·11·83

MARKUU ARKAY: Qod· 69 ee Xeer Sharci L· 2 Soo na baxay 9·9·65kii, Waxa u caddaatay in uu lumay J· War· oo kor ku tilmaaman ayna lahayd Timiro Daahir Xasan·

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo Jeegaas Mar kale ka dib markii lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda ayna ka soo Wareegto muddo 30 maalmood ah, isla markaasna Jeega cusub oo la sameyn doono gacanta laga saaro Jaalle Timiro Daahir Xasan amase cid Wa kaalad Sharci ah ka haysata·

Gaalkacyo, 22·11·83

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB· MUDUG

Sh· Cabdullaahi Hilowle Cali

L· 476

MAXKAMADDA GOB. W/GALBED HARGEYSA

UJEEDDO: Cusboonaysiin Jeeg Wareega ee Lumay Lambarkiisu yahay 558743 27.6.83 Lacagtiisuna Dhan tahay Sh.So. 30.000 lana sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta 1aad Hargeysa.

Guddoomiyaha Maxkamadda G. W. Galbeed ee Har/sa.
MARKUU ARKAY: Arjiga ku taariikhaysan 26.8.83 uuna soo qortay J. Shugri Cilmi Yaasiin, kuna cod sanaysa in loo cusboonaysiiyo J. War. ee Lacagtiisa iyo lambarkiisuba kor ku xusan yihiin

MARKUU ARKAY: Cadeynt Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed. Laanta 1aad Hargeysa, ku na taariikhaysan 5.9.83. oo lagu cadeeyey in laga Sameeyey Bankiga taariikh 27.6.83 Bankiga Gana csiga iyo Keydka Laanta Hargeysa, loona samee yey Shukri Cilmi Yaasiin Lacagtiisuna ahayd 30.000 Shilin.

MARKUU ARKAY: Qod. 69—70 Xeerka Lambar 2 soo baxay 9.9.1965kii.
Wuxuu Go'aamiyey in la kansal Gareeyo Jeegii lumay loona cusbooneysiiyo J. Shugri Cilmi Yaasiin, cusboo naysiina Gacanta laga saaro Jaalaha kor ku magacaa ban 15 maalmood ka dib, maalinta Go'aanka laga soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee J.D.Soomaaliya.

Waxaa La farayaa Maamulaha Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Hargeysa inuu ku Nuqulka Go'aa nkan Bankiga irickiisa si ciddii haysata Jeegii lumay ee kor lagu kansal gareeyey ay uga soo qortaan Caba sho Haddii ay doonaan.

Kaaliyaha Maxkamadda Gobolka W. G. Hargeysa.
Maxamuud Jaamac Cigaal

Hargeysa, 14.9.83

Guddoomiyaha Maxkamadda G. W. Galbeed ee Har/sa.
Ibraahin Faarax Maxamed

L. 474

MAXKAMADDA G. BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Buug Kayd dhumay oo lambarkiisu ahaa 30719 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Labaad kuna qorneyd lacag dhan Sh.So. 14.400/= uu iska lahaa Maxamed Gaabow Dhalxo oo Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Labaad;

HADDUU ARKAY: Qod.69 sharciga Lam. 2 ee 9.9.65;

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kaydka lam. 30719 oo ku qoran magaca Maxamed Gaabow Dhalxo ayna ku jirto lacag dhan Sh.So. 14.400/=.

WUXUU FASAXAY

In Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Labaad u beddelo Jaaile Maxamed Gaabow Buugga Keydka ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib makay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadga Soomaaliyeed, haddii inta ka horaysa aan is-hortaag laga keenin.

Muqdisho, 22.11.83

GUDDOOMIYAHA MGB

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 476

MAXKAMADDA G. BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Jeegga Wareega dhumay oo Lambarkiisu ahaa 635382 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Baydhabo kuna qoran lacag dhan Sh.So. 50.000/= uu iskalahaa Jaalle Maxamed Aadan Cabdi sida ku cad warqadda lambarkeedu 19246 taariikhdu 28.11.83 ee Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xis-Guud;

HADDUU ARKAY: Qod.69 sharciga lam. 2 ee 9.9.65;

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Wareega Lam. 635382 oo ku qoran Jaalle Maxamed Aadan Cabdi ayna ku jirto Sh.So. 50.000/=.

WUXUU FARAYAA

In Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Baydhabo u badalo Jeegga Wareega ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 28.11.83

GUDDOOMIYAHA MGB

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 477

MAXKAMADDA G. BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Jeegga Wareega dhumay oo lambarkiisu ahaa 541233 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Dhexe kuna qoran lacag dhan Sh.So. 50.000/= uu iskalahaa Jaalle Maxamed Faarax Siyaad sida ku cad warqadda lambarkeedu 19243 taariikhdu 28.11.83

HADDUU ARKAY: Qod.69 sharciga lam.2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Wareega Lam. 541233 oo ku qoran Jaalle Maxamed Faarax Siyaad ayna ku jirto Sh.So. 50 000/=.

WUXUU FARAYAA

In Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Dhexe u badalo Jeegga Wareega ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, haddii inta ka horaysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 29.11.83

GUDDOOMIYAHA MGB

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 478

MAXKAMADDA G. BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacyadda kor ku qoran;

HADDU UARKAY: In Jeegga Wareega dhumay oo lambarkiisu ahaa 707042 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Labaad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 50.000/= uu iskalahaa Jaalle Axmed Sheekh Cumar sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 00360 taariikhdu 29.11.83 ee Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Labaad;

HADDUU ARKAY: Qod.69 sharciga lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU . XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeega Wareega Lam. 707042 oo ku qoran Jaalle Axmed Sheekh Cumar ayna ku jirto Sh.So. 50.000/=.

WUXUU FARAYAA

In Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Labaad u badalo Jeegga Wareega ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimograadiga Soomaaliya, haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 30.11.83

GUDDOOMIYAHA MGB

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 479

MAXKAMADDA G. BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacyadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Jeega Wareega dhumay oo lambarkiisu ahaa 707041 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Labaad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 50.000/= uu iskalahaa Jaalle Axmed Sheekh Cumar sida ku cad warqadda lambarkeedu 0033760 taariikhdu 29.11.83 ee Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Labaad;

HADDUU ARKAY: Qod.69 sharciga Lam.2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Wareega Lam. 707041 oo ku qoran Jaalle Axmed Sh. Cumar ayna ku jirto Sh.So. 50.000/=.

WUXUU FARAYAA

In Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Labaad u badalo Jeegga Wareega ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 30.11.83

GUDDOOMIYAHA MGB

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 480

MAXKAMADDA G. TOGDHEER BURCO

UJEEDDO: Faafin Jeegga Wareega ee lam. 044013 oo lumay;

GUDDOOMIYAHA MAX. G. TOGDHHER BURCO

MARKUU ARKAY: Dacwadda ku saabsan Jeeg lumay;

HADDUU ARKAY: Ogaysiinta Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Burco ee taariikhdeedu tahay 10.10.83;

HADDUU AKAY: Qod.69,D,L, (9.9.65 Lumid Jeegga Wareega ee lam. yahay 044013 kuna qoran yahay Axmed Sugule Warsame kuna qoran tahay lacag dhan Sh.So. 20,000/= (Labaatan kun oo shilin);

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo Jeegaas Wareega ee kor ku xusan ee uu ku qoran yahay Axmed Sugule Warsame markii ay ka soo wareegto muddo 20 casho ah laguna shaaciyo FaafintaRasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LAGA CODSANAYAA

In Jeegaas cusub ee la samayndoono gacanta laga saaro Jaalle Axmed Sugule Warsame iyadoo la sugayo muddada kor ku xusan.

BURCO, 11.10.83

GUDDOOMIYAHA MAX. G/TOGDHEER BURCO

(Dr Cabdiraxmaan Sh. Maxamed)

# OGEYSIIS

SHIRKADDA ALLAMAGANS waxay Saamileydeeda ogeysiineysaa in markii la tixraaco go'aanka ku saab sanaa kordhinta raasumaalkeeda oo lagu go'aansaday shirka aan caadiga ahayn ee taariikh 22.2.1981 in ciddii qaybteeda ku bixinweydo muddo 15 (tobaniyoshan) maalmood gudahooda lagana billaabo maalintii uu ogey siiskaan lagu daabaco «Faafinta Rasmiga ee J.D.S.» in qaybteeda inta Saamiley kale diyaar u ah lagu wareejin doono, sidaasna looga saari doono xubinnimada Shirkada taasoo loo cuskanaayo qoddobada 2344 iyo 2439 ee Xeerka Madaniga.

SHIRKADDA ALLAMAGANS

Guddoomiyaha Guddiga Maamulka ee Shirkadda

(Maxamed Maxamuud Axmed «Khaawi»

L. 450/bis